# Codsiga wadajirka ah iyo darajada labaad ee waxbarashada ee Finland

## Wargelinta mas'uuliyiinta ku socota



Jefunne Gimpel




## Nidaamka waxbarasho ee Finaland

Nidaamka waxbarashada ee Finland wuxuu leeyahay saddex darajo. Dugsiga hoose-dhexe waxaa lagu bilaabaa 7 sano jir wuxuuna badanaa qaataa sagaal sano.

Dugsiga hoose-dhexe dabadii ardaydu waxaay codsiga wadajirka ah ku dalbadaan machadyada waxbarasho ee darajada labaad, kuwaas oo ah dugsiyada sare ama machadyada xirfadaha. Waxbarashada wadajirka ah waxa kaloo lagu dalban karaa waxbarashada diyaarinta ee TUVA oo qaadanaysa muddo hal sano ah. Waxbarashada TUVA waxaa la iskugu diyaarinayaa waxbarashada darajada labaad.

Darajada labaad kaddib waxaa la sii wadan karaa waxbarasho darajo sare ah oo jaamacadaha iyo jaamacadaha xirfadaha.

Dhammaan machadyada darajada labaad waxaa lagu qaadan karaa waxbarashada finnishka oo luqadda labaad ah iyo haddii loo baahdo caawimaad macallimiinta baahida gaarka ah.

## Codsiga wadajirka ah

Codsiga wadajirka ah waxaa lagu dalban karaa toddobo boos oo kala duwan. Shahaadada dhammaynta dugsiga buundooyinka lagu qaato ayaa dajinaya meesha uu ku galayo ardaygu. Meelaha qaarkood waxaa lagu qabanqaabiyaa imtixaanada galidda waxbarashada oo dhibcaha lagu helo lagu dari karo buundooyinka shahaadada dugsiga lagu dhammeeyay. Codsiga wadajirka ah waxaa lagu sameeyaa internetka: www.opintopolku.fi.

Sannadka u dambeeya ee dugsiga dhexe ardaygu wuxuu ku khasbanyahay in uu dalbado machad waxbarasho oo darajada labaad ah ama TUVA. Mas'uulka ardaygu waa in uu ka waryahayaa in uu ardaygu codsiga sameeyay.

## Dugsiga sare

Dugsiga sare waa dugsi xadaarad guud qofka siinaya. Xirfad laguma qaato. Ardayda dugsiyada sare badanaa waxaay waxbarashadooda ku sii wataan machad kale marka uu dugsiga sare u dhammaado. Dugsiga sare wuxuu ardayda u diyaariyaa waxbarasho jaamacadeed.

## Biiriyedhada iyo dhibcaha waxbarashada

Dugsiyada sare ardaydu waxaay ku qaataan maadooyin khasab ah iyo kuwo ay dooran karaa. Maadooyinka badankoodu waxaay la mid yihiin kuwa dugsiyada hoose-dhexe. Waxaa dheer in la qaadan karo shahaadooyin dhiblooma ah oo dugsiga sare lagu qaato iyo maadooyin kale oo doorasho leh. Dugsiyada sare waxaay leeyihiin maadooyin kala duwan oo la dooran karo.

Cadadka wxbarashada waxaa lagu xisaabiyaa dhibcaha waxbarashada iyo koorsooyinka. Cadadka waxbarashada ee dugsiga sare ee dhallinyartu waa ugu yaraan 150 dhibcood oo waxbarasho. Waxbarashadu waxaay caadiyen qaadataa saddex sano.

Ardayga dugsiga sare dhigta waa in uu waxbadan akhristaa oo uu qoraa. Intaas waxaa dheer in ay tahay ardaygu in uu iskii u barto qaybo waxbarashada ka mid ah.




## Waxbarashada xirfadda

Machadka xirfadda wuxuu ardaygu ku baran karaa aqoonta aasaasiga u ah xirfaddaas. Ardaygu dugsiga, shaqada iyo oonlaynkaba wuu ku baranayaa xirfadda. Machadka xirfadda waxaa macquul ah in lagu barto 150 xirfadood oo kala duwan. Haddii uu ardaygu imanayo machadka xirfadda isaga oo ka yimidday dugsi hoose-dhexe, waxbarashadiisu waxaay qaadanaysaa sida caadiga ah saddex sano.

## Dhibcaha aqoonta iyo salka aqoonta

Waxbarashada xirfaddu waa mid aqoon lagu salleeyay. Taas macnaheedu waxa weeyaan ardaygu in uu baranayo oo kaliya wax uunan wali aqoon u lahayn. Waxbarashada xirfadda ah waxaa lagu cabiroo dhibco aqooneed. Shahaadada xirfadda waxaa lagu qaataa 180 dhibco aqooneed. Waxaa ka mid ah 145 dhibco aqooneed oo xirfadda ka tirsan iyo 35 dhibco aqooneed oo shahaadada qayb ka ah.




## Machadyada xirfadda ee gaarka ah

Ardayda qaarkood waxaay u baahanyihiin taagero baaxad leh oo baahida gaarka ah ku salleysan, iyadoo ay sabab u tahay tusaale ahaan naafonimo ama xanuun. Iyadu waxaay codsan karaan waxbarashada xirfadda ee loo qabanqaabiyay qaab baahi gaar ah lagu qiimeynayo. Markaas waxbarashada waxaa lagu qabanqaabinayaa machadyo baahi gaar ah loogu talo galay.

## Machadka xirfadda iyo dugsiga sare

Machadka xirfadda waxaa lagu baran karaa waxbarashada dugsiga sare. Waxaa loo yaqaanaa machadka xirfadda ee dugsiga sarena lagu barto. Ardaygu si caadi ah ayuu u baranayaa waxbarashada xirfadda, laakiin isla mar ayuu diyaarinayaa qayb kamid ah waxbarashada dugsiga sare. Waxbarashada dugsiga sare waxaay kabayaan qayb kamid ah waxbarashada xirfadda. Ardaygu shaqada uu qabanayo in badan kama badna inta uu ku dhiganayo machadka xirfadda ee caadiga ah.

Machadka xirfadda ee dugsiga sare markuu dhameeyo qofku wuxuu galaa imtixaanada dugsiga sare wuxuuna helayaa shahaado machadka xirfadda ah iyo ta dugsiga sareba.




## Heshiiska waxbarashada

Waxbarashada xirfadda waxa kaloo lagu diyaarin karaa goob shaqo. Waxaa loo yaqaanaa arrinkaas heshiis waxbarasho. Markaas ardaygu wuxuu ka shaqaynayaa goob shaqo oo lagu barayo xirfaddiisa aqoonta uu ugu baahanyahay. Machadka xirfadda ayaa shaqo bixiyaha la qorsheynaya arrimaha ay tahay in la barto. Ardaygu si joogto aha ayuu u muujinayaa aqoontiisa si uu macallinka u tuso waxa uu yaqaano.  Heshiiska waxbarashadu marka uu dhamaado ardaygu wuxuu helayaa shahaado caddaynaysa xirfaddiisa.

## Waxbarashada TUVA

Haddii ardaygu aanu awoodin ama rabin in uu hore ka bilaabo waxbarashada darajada labaad wuxuu dalban karaa waxbarasho u hiigsigeedu uu shahaado yahay oo diyaarin ah oo loo yaqaan TUVA. TUVA waxaay qaadataa hal sano. Sannadka TUVA ardaygu wuxuu tusaale ahaan soo arki karaa waxbarashada dugsiga sare ama kuwa xirfadda, wuxuu qorsheysan karaa mustaqbalkiisa shaqo, wuxuu kor u soo qaadi karaa buundooyinkiisa dugsiga hoose-dhexe ama wuxuu kor u qaadi karaa aqoontiisa luqadda. Arday kasta oo TUVA dhigta waxaa loo sameynayaa qorshe ardaynimo oo gaar u ah.

## Waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn

Haddii uu ardaygu heli waayo shahaadada dhammaynta dugsiga hoose-dhexe inta aanu dugsigu dhammaanin, wuxuu waxbarashadiisa ka sii wadan karaa waxbarashada aas-aasiga ah ee dadka waawayn. Waxbarashada aasaasiga ee dadga waawayn waxaay leedahay marxaladda hore iyo marxaladda dambe. Marxaladda hore waxaa loogu talo galay dadka waxbarashada dugsiga hoose-dhexe waxyar uun ka dhigtay. Waxbarashada marxaladda dambe waxaa loogu talo galay ardayda ku dhawaad dhammeeyay dugsiga hoose-dhexe. Waxbarashadaa dugsiga hoose-dhexe ee dadka waawayn ardaygu wuxuu ku qaadan karaa shahaadada dhammaynta dugsiga hoose-dhexe ee uu ku dalban karo waxbarashada darajada labaad.





## Wadashaqeynta guriga iyo dugsiga

Waalidku wuu taagerayaa waxbarashada ilmihiisa dugsiga hoose-dhexe iyo darajada labaadba. Waalidka waxaa saaran waajibka koowaad ee barbaarinta iyo waajibka waxbarashada ee cunugga. Xilka dugsigu waa taageeridda waxbarashada iyo koritaanka cunugga ee uu qayb kaga noqonayo bulshada dugsiga.

Wadashaqeynta macallimiinta iyo mas'uuliyiinta cunugga u dhexeysa waxay cunugga ka caawisaa waxbarashada iyo koritaanka. Waxaa wanaagsan in mas'uuliyiintu ay dugsiga la xiriiraan markasta oo ay su'aalo soo qabaan. Waa muhiim in sidoo kale laga qaybqaato fiidadka waalidka lala kulmo.

Marka la wadashaqaynayo waxaa la isticmaali karaa turjubaan. Intaas waxaa dheer in dugsiyada sare ee magaalada Helsinki iyo machadyada xirfadda ee Stadi ay joogaan hageyaal luqado badan ku hadla.

## Muddada waxbarashadu socoto taageero ayaa la helaa

Ardayga waa la hagayaa muddada uu waxbaranayo doorashooyinkiisana waa laga kaalmeynayaa. Hagaha waxbarashadu wuxuu kaa caawinayaa doorashooyinka shaqada iyo waxbarashada dambe la xidhiidha. Machad walba iyo dugsi walba waxaa jooga kalkaaliso caafimaad, soohalka dugsiga iyo cilmu-nafsi yaqaan. Waxaay kaa caawinayaan arrimaha la xiriira nolol wanaagga ardayga.